



FAMILY SERVICES OTTAWA  
SERVICES À LA FAMILLE OTTAWA



# Ilaalinta dhaqaalahaga XIDHIIDKA DHAXDIISA

**MAAHA INAAD KA TAGTO MADAXBANAANIDAADA  
DHAQAALE MARKA AAD GASHO XIDHIIDH.**



Waxaa muhiim ah inaad adiga iyo lamaanahaagu aad ka wada socotaa qaabka falsafada dhaqaale, hadii kale, waxa ay ku keeneysaa caqabad xoongan xidhiidhkiina.

**Waa kuwan waxoogaa tilmaamo ah oo kaa caawinaya inaad yeelato madax banaani dhaqaale oo xidhiidhkaaga ah.**



## XISAABO KALA GAAR AH

**Inaad yeelataan xisaabaad kala gar ah ama in xisaabtaada gaar kaaga noqoto xisaabta lamaanahaaga ayaa ah qaabka ugu wanaagsan ee aad maamulka ugu haynayso oo ay kaaga gaar noqonayso ka xaaskaaga.**

Tani waxay kaa baajinaysaa inaad naftaada iyo himiladaada waydo. In la kala saaro dhaqaalaha ama in la yeesho hal xisaab oo aad kaligaa leedahay waxay kaa caawinaysaa inaad waxoogaa kala madax banaanaataan.

## SIDA LOO MAAMULAYO XISAABAADKA KALA GAARKA AH

**Waa kuwan sadex dariiqo oo aad ku habaysan karto xisaabtaada hadii aad xidhiidh sharciga caadiga ah leedahay ama xaas tahay:**

**1**

### **In la yeesho xisaab la wada leeyahay oo labada mushaharba kusoo dhacaan.**

Dhamaan kharashka la isku daray (oo ay ku jiraan gudista daynta) iyo isku darka kaydka waxaa laga bixinayaa xisaabtan. Inta soo hadha waxaa lagu shubayaa xisaabaadka kala gaarka ah ee lamanaaha si ay ugu isticmaalaan kharashaadkooda gaarka ah oo ay uguna kaydsadaan midba iskii.

**2**

### **Qof kasta mushaharkiisu waxa uu ku dhaca bangigiisa, oo kadibna waxay xadi u wareejinayaa xisaaba ay wada leeyihiiin oo labadooda magac ku qoran.**

Tusaale ahaan, hadii wadarta kharashku ay tahay \$5,000, waxa uu midkiiba soo xawiliyaa \$2,500\*. Inta soo hadhay mid kastaaba xisaabtiisa ayuu ku haysanayaa si uu iskaa bixiyo dayntiisa, u kaydsato iyo kharashkiisa.

\* In 50/50 loo qaybsado ayaan mar kasta macquul ahayn, gaar ahaan hadii uu dakhligu aad u kala duwan yahay.

Tusaale ahaan, qof ayaa qaata \$30,000 qofka kalena waxa uu qaataa \$60,000. Markan oo kale, lamaanuhu waxay go'aansan karaa inaad inay isticmaalaan qaacido macquul ah oo cadaalad ah oo xaaladooda ku salaysan.



**3**

### **Lamaane kastaa waxa uu leeyahay xisaab u gaar ah oo waxa uu ka bixiyaa kharashka xisaabtiisa.** Hadii tani tahay qaabka aad doorbidaysaan, waa inaad marka hore ku heshiisaan cida bixinaysa kharash kasta.

Sida, cida bixinaysa kharashka laydhka iyo cida kharashka raashinka bixinaysa. Hadii labadiinuba aad soo wada iibisaan cuntada, yaa haynaya duwaanka lacag ku baxday?


## GO'AAMADA DHAQAALE

Ka wada hadalka maaliyada iyo in si wada jir ah loo qorsheeyo kaliya ma ilaalinayso dhaqaalahaaga laakiin sidoo kale mustaqbalkaaga ayay ilaalinaysaa. Dejiso yoolal oo wada qorshaysashada ayaa baajin karta wixii lama filaanka ah ee iman kara. Caadiyan, habdhaqan kani waxa uu bilaabmaa bilawga xidhiidhka cusub, laakiin marka wakhti kama tegin in la bilaabo!

### WAXYAABAHA LACA WADA HADLI KARO

#### KAYDKA

- Waa maxay yoolashaada kaydka oo sidee ayaad u kaydinaysaa? Miyaa mid kamid lamaanayaashu lahaa kayd badan xidhiidhka kahor? Maxaa lacagta loogu talo geley oo yaa isticmaali kara?
- Miyaa adiga ama lamaanaaagu leedhiin lacag aad u dhigateen wakhtiga xaalada degdega ah? Hadii aad leedhiin xisaab wadareed ama xisaabaadka kala gaar ah, u diyaar garawga xaalada degdega ahi waxay ka dhigan tahay inaad haysato khayraad aad ku xalin karto hadii xaalad degdeg ahi ay timaado. Lacagta xaalada degdeg ahi waxay ilaalinaysaa kaydkaaga iyo hantidaada kale oo waxay kaa baajinaysaa inaad gasho dayn si aad kharashka lama filaanka ah u dabarto.
- Miyaa adiga ama lamaanahaagu leedhiin kayd hawl gab? Jawaabta su'aashani waxay go'aaminasaa sida aad sanadaha aad waayeeelka noqotaan u noolaanaysaan iyo sida aad u bixinayso kharashka sanadaha aad shaqaynayo.



#### HABDHAQANKA BIXINTA KHARASHKA


- Miyaa lamanahaaga ay ku adag tahay inuu lacag hayo? Miyay kugu adag tahay adiga? Waa maxay falsafadaada ka danbaya lacagtu? Ma waxaa weeye inaad kaydiso ama inaad bixiso?
- Inaad barato habdhaqanka isticmaalka lacaga lamaanahaagu waxay kaa caawinaysaa inaad dejisataan yoolal lamaane ahaan oo aad ogaato aaga uu uga baahan yahay in laga caawiyo.

#### DAKHLIGA IYO KHARASHAADKA QOYSKA

- In hore loo wada socdo, ama kahor in aanad badalin qaabka aad u nooshahay sida iibsiga guri ama kiraysashada guri wayn, ka wada hadla sida aad u wadaagaysaa kharashka guriga. Ma waxa aad u wadaagaysaa khashka qoyska ee la isku daray 50/50?
- Hadii mid kamid ah lamaanayaashu uu qaato wax ka badan ka kale, sidee ayaa taas u maaraynaysaa? Xaaladan oo kale, in loo qaysado kharashka qoyska 50/50, ayaa dhici karta inayna haboonayn, oo cadaalad uma noqonayso oo ma awoodo qofka dakhliga hooseeyaayi.

## DAYNTA / AMAAHDA

- Miyaa lamanaahaagu uu jiraa dayn uga timid xidhiidhkiisii hore? Yaa ka masuul ah bixinta dayntas oo waa maxay qorshaha kaa caawin kara inay taasi dhacdo?
- Waxa akhriya warbixintiina daynta si markaa aad labadiinuba ula socotaan taariikhdiina daynta.
- Sidee ayuu lamanaahaagu u maaraynayaa daynta? Ma wakhtigeeda ayuu ku bixiyaa iyada oo dhamaystiran?
- Waxaa muhiim ah inaad ka waraysato lamaanahaaga sida uu u maarayn jiray daynta wakhtigii hore. Ma waxa uu doontay kaalmada guditaanka daynta sida qorshaha macmiilka ama ka heshiinta daynta?



## WAKHTI SAMAYSTA AAD KAGA WADA HADASHAAN LACAGA

- Samaysta 15-30 daqiiqo bishii oo aad kaga wada hadashaan bixinta kharaska ama ka wada sheekeysta lacagta.
- Xasuuso inaad muujiso dulqaad oo waxa aad xasuusataa sida ay tahay u tahay mid ku keeni karta baqi iyo cidhiidhi lamaanahaaga. Sidoo kale, maaha wakhtigii qofka loo yeelan lahaa aragtii, oo mana aha wakhtigii la is eedeyn lahaa. Waxaa weeye wakhti jacayl iyo makaan amaan ah, u samaysta si aad uga wada hadashaan oo aad si furan uga wada sheekeysataan lacagta.

Liiskan kuma wada jiraan wax kasta oo ay tahay in lamaahuhu ka wada hadlaan, laakiin waxaa weeye meel wanaagsan oo laga bilaabi karo. Waxaa jira waxyaabo aad aragtii isku mid ah ka wada leediihin, oo waxaa jira waxyaabo u baahan inaad si wanaagsan uga wada hadashaan. Waxay doonto ha noqotee, xasuusnaw adiga ayaa u haya majaraha maaliyadaada iyo qof aad jeceshahay, oo waa in aanad ku ciyaarin taas.

\*This program is funded by the Government of Canada and Women and Gender Equality Canada (WAGE) through the Canadian Women's Foundation.

